***Gogoldhig***

*Mashruucan Xeer ee Qabyo Qoraalka ah waxa diyariyey Ibraahim Xaashi Jaama, www.somalilandlaw.com oo waxa loogu talo galay in Golaha Wakiilada iyo Gudigiisa, Ramadaan ka dib, ay dib u eegan* ***Mashruuca Xeerka Saamiga Kuraasta Haweenka iyi Dadka laga Tirada Badanyahay*** *(oo halkan ku lifaaqan) oo hadda hor yaala Gudida Arrimaha Gudaha ee Golaha. Mashruucaasi, sida uu hadda u dhigan yahay wuxuu ku saabsanyahay doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo kuwa Baarlamanka.*

*Iyadoo laga fiirsanayo ahamiyada ay leedahay doorashooyinka golayaasha deegaanka ee inaguu soo fool leh, waqtiganna ay Ramadanna soo galeyso oo Goluhu bilaabay fasax lix usbuuc ah ilaa bilowga Sebtambar, xeerarkii doorashooyinka baarlamaankana aan sanadkan cidibi eegeen, waa in mudnaan la siiyaa sidii Xeerka Doorashooyinka Deegaanada (Xeer 21/2001) deg deg wax looga bedeli lahaa si kuraasta saamiga hadda loogu daro, doorashan ka hor.*

*Waxa mashruucan xeer la socoto faalo dheer oo cadeynasa in saamiga kuraastu aanu ka soo horjeedin Distoorka Somaliland oo la jaanqaadayo distoorka iyo xeerarka caalimiga ah.*

*Wixii aaraa' ah ee ku saabsan mashruucan xeer fadlan nagala soo xidhiidh:*

*editor@somalilandlaw.com*
*20 July 2012*

---

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**
**MASHRUUC XEER (QABYO QORAAL)**

**WAX-KA-BEDDELKA XEERKA DOORASHOOYINKA MADAXTOOYADA IYO GOLAYAASHA DEEGAANKA (Lr. 20/2001) - LIFAAQA 5AAD EE 2012**

**Golaha Wakiilada**

**Markuu Arkey:** Qodobka 8aad, 21(2)aad, 22aad, iyo 36aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland;

**Markuu Arkey:** Tallo Bixinta Guddida Daraaseynta Xoojinta Kaalinta Haweenka iyo Dadka laga Tiro Badan Yahey ee Ka-qayb galka Siyaasada, oo uu Golaha u soo Gudbiyey Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland, sumadeeduna tahay: REF: JSL/M/SHGW/081-944/022012 kuna taariikheysan 08/03/12;

**Markuu Xaqiiqsaday:** Xaqa ay Haweenka iyo Dadka Laga Tirada Badanyahay u leeyihiin in ay ka qayb-galaan siyaasada dalka iyo Golayaasha Qaranka Jamhuuriyada Somaliland;

**Markuu Ogaadey:** In dumarka iyo Dadka Laga Tirada Badanyahay aysan Saami ku filan

ka helin doorashooyinkii Golayaasha Qaranka ee Jamhuuriyada Somaliland;

**Markuu ku Qancey**: In saami loo qoondeeyo Haweenka iyo Dadka laga Tirada Badan yahay ay xoojinaso sinaanta muwaadiniinta;

**Markuu Arkay:** In doorasha Golyaasha Deegaanada ee dhowaan dhacyesaa ahmiyad gaar leedahay oo xeerarka ku saabsan oo dhan si deg dega ah loo dhameystiro hadda, xeerarka doorashooyinka Baarlamaanka ku saabsanna waqtigooda wax laga beddeleyana lagu daridoono saamiga haweenka iyo dadka laga badanyahay;

Waxa uu soo Saarey
Wax-ka-beddelkan Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanada (Lr. 20/2001), Lifaaqa 5aad ee 2012

**Qodobka 1aad: Macnaha Ereybixinta**

Qodobka 1 aad (Macnaha erey-bixinta) ee Xeerka waxa lagu daray ereyadan:

"**Dadka laga tirada badan yahay**: Waxa loola jeedaa dadka ka soo jeeda beelaha dadka dhaqan ahaan la heyb sooco oo ah oo ah Madhibaanka, muusedheriyo, yibro iyo tumaalo; haddii loo bahdo in erygan baaxadiisa wax laga bedelana, waxaa lagu soo saaridoona Xeer Madaxweyne.

**Saami Goyn:** Waxa loola jeedaa saamiga go'an ee looga qoondeeyo haweenka ama dadka laga tirada badanyahay.

**Kuraasta Saamiga ah** (Reserved seats): Waxa loola jeedaa kuraasta loo qoondeeyey Haweenka ama dadka laga tirada badan yahey oo ay murashixiinta iyaga ka mid ah oo keliya ay xaq u leeyihiin in ay ugu tartamaan sida ku xusan Xeerkan

**Kuraasta Guud:** Waxaa loola jeeda kurasta kale een saamiga aheyn oo murashixiinta oo dhammi ay u tartmayaan."

**Qodobka 2aad: Tirada Golayaasha Degaanka**

Qodobka 4aad ee Xeerka sidan ayaa loo bedellay:

1. Weedha hadda Qodobka 4aad ku jirta ee tirade xubnaha Golayaasha Deeganada waxey noqneysa Faqradda 1aad ee Qodobkan.

2. Waxaa Qodobka lagu kordhinayaa labadan Faqaradood:

"2. Kuraasta saamiga ah ee loo qoondheeyey murashixiinta dumarka ah waxay noqonayaan sidan:

| | | |
|---|---|---|
| b. | Golaha Deegaanka Caasimada | 4 Mudane |
| t. | G/Deegaanka Degmooyinka Darjada A | 3 Mudane |
| j. | G/Deegaanka Degmooyinka Darjada B | 2 Mudane |
| x. | G/Deegaanka Degmooyinka Darjada C | 1 Mudane |
| kh. | G/Deegaanka Degmooyinka Darjada D | 1 Mudane |

3. Kuraasta saamiga ah ee loo qoondheeyey murashixiinta dadka laga tirada badan yahyey waxay noqonayaan sidan:

| | | |
|---|---|---|
| b. | Golaha Deegaanka Caasimada | 1 Mudane |
| t. | G/Deegaanka Degmooyinka Darjada A | 1 Mudane |

4. *Doorashooyinka Deegaanada ee la qabanayo sanadakan 2012 waa kuwa Golayaasha Caasimada iyo Deegaanada darajadoodu tahay A, B iyo C. Iyadoo la tixgelinayo Qodobka 7aad ee Xeerka Ismaamulka Gobollada iyo Degmooyinka (Xeer Lr. 23/2002), codbixiyaasha ku nool Degmooyinka darajadoodu tahay "D" waxay u codeynayaan, haddii aaney Koomishanku qaarkood si kale u cayimin, golayaasha degmooyinkii darajada A, B ama C ee degmadoodu ka faracmatay[1]."*

## Qodobka 3aad: Habka Doorashada

Qodobka 22aad ee Xeerka, marka laga reebo Faqradda 1aad ee lagu cayimey Lifaaqii 5aad, waxaa Faqradaha kale loo beddelay sidan:

"2. In kastoo warqadda coddeynta ay ku qoranyihin dhamaan murashixiinta xisbiyada iyo ururada oo dhan ee u tartamaya kuraasta deegaan kasta, cod bixiyuhu wuxu u codeynyaa hal murashax oo keliya, codkaasna ayaa loo tirinayaa murashaxa iyo xibigiisa/ururkiisa.

3. Kuraasta guud ee degmo-doorasho kasta, oo aany ku jirin kuraasta saamiga ah, waxay xisbyadu/ururadu ku kala helayaan habka saami qeybsiga (Proportional Representation) ee kuraasidaas guud iyo codadka xisbi/urur kasta ka helo deegaankaas.

4. Marka la tiriyo wadaarta guud ee codadka ansaxay ee deegaan kasta, waxaa loo qaybinyaa cadadka kuraasta guud oo deegaankaas, oo laga reebay kuraasta saamiga, si loo ogaado qadarka cododka ee hal kursi lagu heli karo. Waxaa markaas laysu qaybinayaa tirada codadka xisbi/urur kasta uu deegaankaas ka helay iyo qadarka codadka ee hal kursi lagu heli karo, oo ay ka soo bixi doonto cadadka kuraasta xisbi/urur kasta. Wixii jajab codad ee qaybsigaas ka soo hadha, waxaa kuraasta hadhey loo kala qaadanyaa sida jajabkaasi u kal badan yihiin (largest remainders).

[1] Faqradani ma khuseyso kuraasta saamiga ah ee laakin waa mid ku jirtey Xeerka 23/2002 intii aan le bedelin 2006kii oo suurta gelisey in si sharciysan degmooyinka ay u codeynayaan dadka ku nool deegaanada darajadoodu tahay D. Waa laga saari haddii Komishanku ku taliso in aan loo baahneyn Faqradan.

5. Kuraasta guud ee xisbi/urur kastaa uu ka helo degmo-doorasho kasta, oo aaney ku jirin weli kuwa saamiga ah, waxaa loo qaybinaya dhamaan murashixiinta deegaankaas ee liiska furan ee xisbigaas/ururkaas sida ay u kalo cod badanyihiin. Haddii ay labo murashax ama in ka badan oo isku xisbi/urur ah ay ka helaan deegankaas codad siman oo uu hadhey kursi kali ah, waxa lagu kala saaraya murashaxiinta hab nasiib ah oo ay Kommishanku abaabusho, xisbiyada/ururada iyo muraashixiintaasina ay goob joog ka ahaadaan.

6. Si aan shaki u gelinba, dhamaan murashixiinta ku jira liiska xisbi/urur ee deegaan wey u siman yihiin in ay u tartamaan kuraasta guud ee aan samiga aheyn.

7. Marka la dhameeyo talaabooyinka ku xusan Faqradaha 3aad, 4aad iyo 5aad ee Qodobkan ayaa loo gudbayaa qaybinta kuraasta saamiga ah. Kuraasta saamiga ah ee dumarka ee deegaan kasta waxaa u tartamayaa oo keliya murashixiinta dumarka ah ee aan helin kursi guud. Sidoo kalena kursiga saamiga ah ee dadka laga tiro badan yahay waxaa u tartimi kara oo keliya murashixiinta aan helin kursi guud, horeyna xisbigiisa ama ururkiisa uu Kommishanka u cayimey doorashada ka hor in uu yahay qof ka mid ah dadka laga tirada badanyahay.

8. Iyadoo la tixgalinyo yaraanta Kuraasta saamiga ah iyo badnaanta xisbiyada/ururada iyo habka liista furan ee doorashada, waxaa loogu qaybinyaa murashixiinta dumarka ah ama dadka laga tirade badan yahay kuraasta saamiga degmo doorasho ee midba khuseysa sida ay murashixiintaasi aan ku guuleysan kursi guud ay codadkooda u kala sareeyaan[2]. Haddii ay labo murashax ama in ka badani oo kursi saamiga ah loo eegayo kan helayaa ay cododka ay helaan isla siman yihiin, waxaa lagu kala saaraya murashaxiintaas hab nasiib ah oo ay Kommishanku abaabusho, xisbiyada/ururada iyo muraashixiintaasina ay goob joog ka ahaadaan.

9. *Haddii ay deegaan ama goobihiisa doorasho qaarkood, duruufu gaar ah awgeed, doorashada degaanka ka dhico weydo oo Kommishanka, iyadoo la tashatay xukuumada, xibiyada/ururada ay sidaas ku cayimiso, waxaa sidii ay suurtagel tahayba loogu qaybinayaa xisbiyada/ururada kuraasta saamiga ah si la mid ah qaybista kuraasta guud oo ku saleysan boqoleyda (percentage) wadaarta guud ee codadka ay deegaanka intiisa kale ama dalka intiisa kale xisbiyada/ururadu ka helaan, marba kii la door bido ee leysku raaco doorashada ka hor. Xisbi/urur kastaa markaas ayuu u bedelaya liiska murashixiinta mid xidhan oo kuraasta ay helaan loo qeybinayo sida magacyada liisasku u kala horreeyaan [3].”*

## Qodobka 5aad: Buuxinta Kurisaada Banaanaada

---

[2] Waa habka loo yaqaan “best loser” method, marka lala eego cida kuraasta guud heshay; ama “best winner” method, marka lala eego murashixiinta kuraast saamiga u taratmaya.

[3] Qodob kan la mid ah ayaa ku jirey Xeerki Doorashada Wakiilada (2005). Haddii Kommishanku qabaan in aan loo baahaneyn Faqradan , waa laga saari karaa wax ka bedelkan. .

Waxaa lagu daray Xeerka Qodob cusub oo lambarkiisu noqonaya Qodobka 22B oo ku xiga Qodobka 22aad:

"**Qodobka 22Baad: Buuxinta Kuraasida Banaanaada**

1. Murashixiinta ku guuleysan waaya doorashada Deegaanka, waxay gidigood kuraasta guud ee aan saamiga aheyn u noqonayaan keyd iyadoo kursigii banaanada uu buuxinayo murashaxaa liiska xisbiga/ururka kursigaa horey doorasada ugu guuleystay ku xiga xagga tirada codadka.

2. Murashixiinta dumarka ahi iyo kuwa dadka laga tirada badan yahay ee aan ku guuleysan doorashada deeganka waxay keyd u ahaanyaan kuraasta saamiga ah ee khuseysaa. Kursigii saamiga ah ee banaanada, waxaa buuxinyaa murashaxa helay doorashada tirada codka ee ku xigta tiradii uu helay murashixii guuleystay, iyadoo oo aan la tixgelineyn xidbiga/urur murashaxaas.

3. Haddii murashaxiinta keydka ahi ee buuxinaya kursiga banaanaada sida ku xusan fagrada 1aad iyo tan 2aad ee Qodobkan aanu horey isaga soo sharaxin xisbi/ama urur doorashada deegaankaas ka dib noqday Xisbi qaran:
   b) waa in, haddii uu buuxinayo kursi guud, ku biira xisbiga qaran ee uu qofkii kursiga banaaniyey, isagoo u hogaansan habka ku xusan Qodobka 24(1)aad ee Xeerka Nidaamka Ururada iyo Xisbiyada Siyaasada (Xeer Lr. 14/2011), ku biirey doorashada ka dib, waxaanu ogeysiinaya Kommishanka bil gudaheed marka uu jagadaas buuxiyo;
   t) waa in, haddiise uu buuxinayo kursi saami ah uu, isagoo tixgelinya habka Qodobka 24(1)aad ee Xeerka Nidaamka Ururada iyo Xisbiyada Siyaasada (Xeer Lr. 14/2011), ku biira sadexda xisbi qaran mid ka mid ah, ogeysiiyaana Kommishanka bil gudaheed marka uu jagadaas buuxiyo."

**Qodobka 4aad: Qaabka soo Bandhigada Murashixiinta**

Qodobka 23aad, Faqaradiisa 2aad, ee Xeerka waxa lagu daray labadan xaraf (kh) iyo (d) oo ku xiga xarafyada b, t, j, x:

"kh) Caddeyn uu saxeexay mas'uul xisbiga/ururka gudigiisa degmada ka mid ah oo xaqiijinaya in liiska murashixiinta ay ku jiraan dumar iyo dadka laga hayb soocdo oo tiradooddu aanay ka yareen tirada kuraasta saamiga.
d) Caddeyn uu saxeexay mas'uul xisbiga/ururka gudigiisa degmada ka mid ah oo xaqiijinaya magaca murashax kasta oo liiska ku jira oo xaq u leh in uu u tartamo kursiga saamiga ee dadka laga tiro badan yahay oo uu murashaxaasina saxeexaxy. Caddeymadaas waa mid u gaar ah Komishanka oo isticmaalya maculuumaadkaas doorasha ka dib marka cida ku guuleysatay tartanka kuuraasta saamiga ah lasoo saarayo oo lagumo darayo waraaqaha codbixinta."

**Qodobka 5aad: Laalis**

1. Waxaa la titirey Faqradda 3aad ee Qodobka 27aad ee Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka (Xeer Lr. 23/2002) oo ku saabsan habka buuxinta kuraasta banaananta.

2. Waxa la laaley qodobada xeer ama xeer nidaamiye ee ka soo horjeeda Wax ka bedelkan Xeer Lr. 20/2001 (Lifaaqa 5aad).

**Qodobka 6aad: Dhaqan-Galka**

Wax ka bedelkan Xeer Lr. 20/2001 oo ah Lifaaqii 5aad wax uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Xeer-dejintu ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxeexo.

---

*Lifaaq: Qabyo Qoraalaka Xeerka Saamiga ee Gudida Golaha Wakiiladu soo saartey ee hadda dib u eegayaan.*

## GOLAHA WAKIILADA JAMHUURIYADA SOOMAALILAND

## Guddida Arimaha Gudaha Nabad-gelyada iyo Difaaca

## Xeerka Saamiga Haweenka iyo Dadka Laga Tirada Badan Yahey ee Ka Qayb-Galka Qabyo Qoraal
## Xeer Lr. XXXX/2012

**Golaha Wakiilada Jamhuuriyada Soomaaliland:**

**Markuu Arkey:** Qodobka 36aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland.

**Markuu Arkey:** Tallo Bixinta Guddida Deraaseynta Xoojinta Kaalinta Haweenka iyo Dadka laga Tiro Badan Yahey ee Ka-qayb galka Siyaasada, oo uu Golaha u soo Gudbiyey Madaxweynaha Jamhuuriyada Soomaaliland, sumadeeduna tahay: REF: JSL/M/SHGW/081-944/022012 kuna taariikheysan 08/03/12.

**Markuu Xaqiiqsaday:** Xaqa ay Haweenka iyo Dadka Laga Tirada Badanyahay u leeyihiin in ay ka qayb- galaan siyaasada dalka iyo Golayaasha Qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland.

**Markuu Ogaadey:** In dumarka iyo Dadka Laga Tirada Badanyahay aysan Saami ku filan ka helin doorashooyinkii Golayaasha Qaranka ee Jamhuuriyada Soomaaliland.

**Markuu ku Qancey:** In saami loo qoondeeyo Haweenka iyo Dadka laga Tirada Badan yahay ay xoojinaso sinaanta muwaadiniinta.

**Waxa uu soo Saarey Xeerkan:**

### Qodobka 1aad
### Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxa loo adeegsan doonaa doorashooyinka Golayaasha Deegaanka ,Wakiilada iyo Guurtida ee Jamhuuriyada Soomaaliland ka dhaca, iyada oo looga faa'iideyn doono Haweenka iyo Dadka Laga Tirada Badan Yahay.

### Qodobka 2aad:

Xeerkan, erayadan soo socda waxa loo macneyn doonaa:

**Dadka laga Tirada Badan yahay**: Waxa loola jeedaa dadka ka soo jeeda beesha adka dhaqan ahaan la heyb sooco.

**Degmooyinka (A+,A,B,C iyo D):** Waxa loola jeedaa darajada degmooyinka ee ku cad

Xeerka Maamulka Gobolada Degmooyinka Xeer Lr. 23/2002.

**Golayaasha Qaranka**: Waxa loola jeedaa Golayaasha Deegaanka iyo Wakiilada.

**Saami Goyn:** Waxa loola jeedaa saamiga go'an ee looga qoondeeyo haweenka iyo dadka laga tirada badanyahay Golayaasha Qaranka.

**Si Guud:** Waxa loola jeedaa kuraasta ka baxsan saamiga loo qoondeeyey Haweenka iyo Dadka laga tirada badan yahey.

**Si Gaar Ah:** Waxa loola jeedaa saamiga loo qoondeeyey Haweenka iyo dadka laga tirada badan yahey.

## Qodobka 3aad: Magac Dhaw

1. Xeerka waxa magaciisu noqonayaa Xeerka Saamiga Haweenka iyo Dadka Laga Tirada Badan yahay ee Ka Qayb-Galka Siyaasada Dalka.

2. Qodobada Xeerkan waxa lala akhriyaa Xeerka Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada.

## Qodobka 4aad
## Ujeedooyinka Xeerka

1. Ujeedooyinka Xeerkan waxa ka mid ah:

   a. In saami go'an oo ay dhexdooda ku tartamaan loo qoondeeyo Haweenka iyo Dadka laga tirada badanyahay golayaasha Qaranka ee Jamhuuriyada Soomaaliland.
   b. Kobcinta iyo kor u qaadista haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay ee ka qayb-galka talada dalka.
   c. Xoojinta Kaalinta Haweenka iyo dadka laga tirada badanyahay ee ka qayb galka siyadaasada dalka.

## Qodobka 5aad
## Saamiga Go'an ee Haweenka ee Gobolada iyo Degmooyinka

1. Saamiga Haweenka ku lahaan doonaan Golayaasha Qaranku waxa uu ahaan doonaa sidan soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| a) Golayaasha Deegaanka ee Darajada | A+ | 4 XUBNOOD |
| b) Golayaasha Deegaanka ee Darajada | A | 3 XUBNOOD |
| c) Golayaasha Deegaanka ee Darajada | B | 2 XUBNOOD |
| d) Golayaasha Deegaanka ee Darajada | C | HAL XUBIN |

2) Saamiga Haweenka ee kuraasta Golaha Wakiilada wuxuu ahaanayaa 10% tirada guud ee Golaha Wakiilada oo u Gobolaysan sidan hoos ku qoran:-

a) Gobolka Madoori Jeex 2 xubnood.
b) Gobolka Togdheer 2 xubnood.
c) Gobolka Awdal 1 xubin.
d) Gobolka Sanaag 1 xubin.
e) Gobolka Saaxil 1 xubin.
f) Gobolka Sool 1 xubin.

3) Saamiga Haweenka ee kuraasta Golaha Guurtida wuxuu ahaanayaa 10% tirada guud ee Golaha Wakiilada oo u Gobolaysan sidan hoos ku qoran:-

g) Gobolka Madoori Jeex 2 xubnood
h) Gobolka Togdheer 2 xubnood.
i) Gobolka Awdal 1 xubin.
j) Gobolka Sanaag 1 xubin.
k) Gobolka Saaxil 1 xubin.
l) Gobolka Sool 1 xubin.

## Qodobka 6aad
## Saamiga Dadka Laga Tirada Badan Yahey ee Gobolada iyo Degmooyinka

1. Saamiga go'an ee dadka laga tirada badan yahey ku lahaan doonaan Golayaasha Qaranku waxa uu ahaan doonaa sidan soo socota:

a) Golayaasha Deegaanka Darajada (A) Hal Xubin
b) Golaha Wakiilada Hal xubin
c) Golaha Guurtida Hal Xubin

2. Xubnaha Golaha Wakiilada iyo Guurtida ee Beelaha laga Tirada Badan yahay Gobolada ay ka soo kala bixi doonaan waxa lagu go'aaminayaa Labada Gobol ee ay ugu codka badan yihiin Doorashooyinka Golayaasha Deeganka .

## Qodobka 7aad
## Habka Doorashada ee Murashaxiinta Saamiga Haweenka iyo Dadka Laga Tirada Badan Yahay

1. Xisbi/urur kastaa waxa uu si gooni ah ugu soo gudbin doonaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka murashixiinta haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay ee u tartamaya Golayaasha Wakiilada,Guurtida iyo Deegaanka saamiga looga qoondeeyay gobolkaasi/Degmadaasi.

2. Iyada oon lagu xad-gudbeyn Qodobka 40aad ee Dastuurka JSL, Qodobka 10aad ee Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada Farqadiisa 2aad, (Xeer Lr. 20-2/2005), Qodobka 22 ee Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo G/Deegaanka Xeer lr. 20/2001, iyo Lifaaqyadiisa 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad, guud ahaan kuraasta golayaasha deegaanka , Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida ee gobol/degmo kasta waxa loogu tartamayaa laba qaybood, oo kala ah;

a. Si guud;
b. Si gaar ah.

3. Kuraasta saamiga Haweenka iyo dadka laga tirada badan yahey dhexdooda ayay ku tartami doonaan, waxana loo soo kala bixi doonaa sida ay u kala cod badan yahiin.

4. Kuraasta aan ahayn saamiga Haweenka iyo Dadka laga tirada badan yahay waxa loogu tartami doonaa si guud.

**Qodobka 8 aad**
**Laalis**

Xeer kasta oo ka soo horjeeda Xeerkani waa waxba kama jiraan (null and void).

**Qodobka 9aad**
**Dhaqan-Galka**

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Xeer-dejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo.